JADEECADU KALIYA MA AHAN FIN YAR

Jadeecadu waxay noqon kartaa mid khatar ah, gaar ahaan dhallaanka iyo ilmaha yaryar.

Calaamadaha jadeecada caadi ahaan waxaa ka mid ah:

Qandho badan
(waxay ka sarrayn kartaa 104˚F)

Qufac

Biyo ka socdo sanka

Indho cas iyo/ama biyo leh

Finan
(waxayna soo baxaan 3-5 maalmood kadib marka calaamadaha ay bilowdaan)

Jadeecadu waxay noqon kartaa mid halis ah.

Jadeecadu waxay keeni kartaa dhibaatooyin caafimaad oo aad u daran, oo ay ku jiraan burkiito, bararka maskaxda (maskax-barar) iyo dhimasho.

1 ka mid ah 5-tii qof ee ay ku dhacdo jadeeco isbitaal ayaa la dhigaa.

1 ka mid ah 20-kii carruur ah ee qaba jadeeco waxaa ku dhaca burkiito, oo ah sababta ugu badan ee keenta dhimashada ka dhalata jadeecada ee ilmaha yaryar.

1 ka mid ah 1,000-kii qof ee qaba jadeeco waxaa ku dhaca maskax barar, kaasoo keeni kara dhaawac soo gaara maskaxda.

1 ilaa 3 ka mid ah 1,000-kii qof ee qaba jadeeco ayaa u dhinta.

Dhibaatooyinka muddada-dheer ah

Cudur naadir ah, balse dilaa ah oo la yiraahdo subacute sclerosing panencephalitis ayaa imaan kara 7 ilaa 10 sano kadib marka qofka uu ka bogsado jadeecada.

Waxaad awood u leedahay inaad difaacdo canugaaga.

Carruurtaada sii difaac badbaado ah oo waara oo kadhan ah jadeecada adigoo xaqiijinaya inay qaataan tallaalka jadeecada-qaamow-qanshiirka-rubella (MMR).
La-hadal bixiyahaaga daryeelka caafimaadka.

CDC www.cdc.gov/measles